



Farriintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay <https://go.usa.gov/xtBQC>.

Juun 23, 2022

Ku socota: Shaqaalaha ODDS iyo Hawl wadaagayaasha
Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka
Ujeedada: Isbeddelada noocyada heerka lacageed ee Luulyo 1 oo loogu talagalay adeegyada iyo taageerooyinka ODDS

Iyada oo qayb ka ah [Compass Project](#), oo loogu talagalay in uu wanaajiyo nidaamka naafanimada korriinka ee Oregon si uu u noqdo mid qofka diiradda la saarayo, ODDS waxay ku isku diyaarinaysaa in ay hirgeliso noocyada heerarka lacageed oo cusub oo loogu talagalay inta badan adeegyada ODDS oo dhaqan galaya Luulyo 1, 2022. Noocyadani waxay ka turjumayaan, koror guud, oo la taaban karo oo ku yimid maalgelinta nidaamka adeeg ee naafanimada maskaxda iyo korriinka (I/DD) ee Oregon.

Sida bixiyayaasha adeega dadka oo dhan, bixiyayaasha I/DD waxaa waqtijan la joogo ku adag in ay wax shaqaaleysiyaan oo sii haystaan shaqaale. Iyada oo aan filayno in maalgelintani caawiso, ma saadaalinayo in xal degdeg ah laga gaaro caqabadahani dhanka shaqaalaha. Waxaan sii wadnaa in aan la shaqeyno daryeel bixiyayaasha iyo hawl-wadaagayaasheena bulshada si loo xasiliyo nidaam uu caqabad u keenay cudurka baahsani.

Si loo joogteeyo taageerada loogu talagalay daryeel bixiyayaasha, ODDS waxay oggolaansho ka raadinaysaa CMS si ay u sii wado korodhka ah boqolkiiba 5 ee heerka lacageed ee xaalada degdega ee ku meel gaarka ee COVID-19 oo loogu talagalay 90 maalmood oo dheeraad ah ka dib Luulyo 1, 2022. Dhowr adeeg ayaa ka reebinaan doona: nolosha la taageero, 1:1 daryeel bixinta (guriga-dhexdiisa) iyo gaadiidka.

ODDS ayaa ka shaqeynaysa in ay bixiso maalgelinta waqtiga kala guurka oo hal mar ah oo la siiyo hay'adaha daryeelka bixiya ee ay saameynta ugu badan ku yeesheen hirgelinta kooxaha adeega iyo heerarka lacageed ee cusub. Maalgelintaasi ma noqon doonto mid loogu talagalay daryeel bixiyayaasha oo dhan. Waxaan shaqeynaynaa anaga oo adeegsanayna

nidaamyo gudaha ah si loo bixiyo maalgelintaasi waxaanan bixin doonaa macluumaad dheeraad ah sida ugu dhakhsaha badan ee aan awoodno.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan waxyaabaha la iska reebay, waxaan si adag u dhiirigelinayaa ka qayb qaadashada wicitaanada taageerada farsamo ee Compass ee ku saabsan waxyaabaha la iska reebay. Faahfaahin ayaa la helayaa oo ku jirta [fariintan wax gudbinaysa](#).

Intaasi waxaa dheer, in ODDS ay si joogto ah u cusbooneysiinayso Tababarada Compass Project, iyada oo liis diiwaan gashan iyo tababarada soo socda ay ku qoran yihiin [fariintan wax gudbinaysa](#).

Waan ogahay in waqtiga kala guurka iyo isbeddelku ay yihiin kuwo adag, iyada oo aan loo eegayn muddada dheer ee aan ka soo shaqeynay iyaga. Waxaan kaaga mahadcelinaynaa dulqaadkaaga iyo iskaashigaaga inaga oo ka wada shaqeynayna hirgelinta talaabadan la taaban karo ee guud ahaan mashruuca Compass.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Fariintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa

<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.